

Baaraha xaaladda dugsiyada wuxuu booqan doonaa dugsiiga aad dhigato

Baaryeyaasha xaaladda dugsiyada waxay hab joogto ah, u booqdaan dhamaan dugsiyada dalka ku yaalaan. Baaryeyaasha xaaladda dugsiyada waxay baaraan dugsiyada ay maamulaan dowladaha hoose iyo kuwa gaar ahaanta loo maamulo. Hadafka baarintaanka laga leeyahay ayaa wuxuu yahay, in arday kasta uu bay'ad ammaankeeda sugan yahay wax ku barto.

Waa maxay sababta dugsiiga aan dhigto looga soo xushay dugsiyada kale?

Kahor intii usan dugsiyada booqan, wuxuu Baaraha xaaladda dugsiyada ku dhaqaaqa sahminta natiijada waxbarashada ee dhamaan dugsiyada, natiijadii boqashadii berri hore iyo haddii dacwad laga soo gudbiyay dugsiiga la booqan doono. Waxaa kaloo fiirogaar la siiyaa natiijada qoraal-waydiimaha Baaraha xaaladda dugsiyada ee ay ka jawaabeen dhawr arday, xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta iyo macalimiinta. Xulashada dugsiiga la booqan doono qodobadaas ayay ku salaysan tahay.

Sidee ayaan xogta dugsiiga ugu soo uruurinna?

Hawlgallada Baaraha xaaladda dugsiyada waxay ku salaysan yihiin booqashada xisadaha, waraysi loola yeesho ardayda iyo agaasimaha dugsiiga. Mararka qaarkood waxaa xitaa waraysi lool yeesha shaqaalaha kale iyo xitaa xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta.

Waraysiga ardayda loola yeesho waa muhim. Maxaayeelay, waxay Baaraha xaaladda dugsiyada uu suurtagelin doontaa in uu muuqaal fiican ka helo xaaladda dugsiiga. Ardayda waraysiga loola yeelan doono waxaa kahor wargelin doono agaasimaha dugsiiga. Ardayga uma baahna in uu waraysiga isku diyaariyo. Tan kale, ka qaybgelida waa ikhtiyaari. Haddii ardayga usan doonayn in waraysi loola yeesho ama xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ay ka qaybgelida uu oggolayn, waa in shaqaalaha dugsiiga wargelisaan.

Warqadaan waxaa loo diri doonaa dhammaan ardayda iyo xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta, xitaa ardayda aan warayso loola yeelan doonin.

Booqasha kaddib maxaa dhici doono?

Baarintaanka kaddib waxay Baaryeyaasha xaaladda dugsiyada gaari doonaan go'aan. Waa go'aanno kala duwan hadba nooca booqashada ama baaritaanka la sameeyay. Barta internetka www.skolinspektionen.se ayaa warbixin dheeraad oo ku saabsan hawlgallada Baaraha xaaladda dugsiyada laga aqrisan karaa.